# Golaha Wakiillada

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Fadhigii 3aad ee Kal-fadhiga 7aad*

***Wakhtiga 09:41* AM** ilaa **12:03 Am**
***Taariikhda: - Sati 30 December 2023***

**Gudoonka: -** Md. Yaasiim Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Quranka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga: -** Dooda Xaalada Guud ee Dalka

**Md. Mustafe Axmed Cabdilaahi (Khayreeye)** *(23min, 44sec):-* Guddoomiye, Shir-guddoonka, Mudanayaasha Golaha Wakiillada, Shaqaalaha Golaha, Saxaafadda, ASC, bacda salaam.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, sidaynu la soconno, annagoo ah Mudanayaasha Golaha Wakiillada oo ah mudanayaashii shacabka Somaliland cod aqlabiyad ah ku soo doorteen, kuna jira muddo-xileedkoodii, waxa na saaran masuuliyad qaran iyo mid shacab oo aan u dhaaranay.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, sidaynu la soconno, dalka maanta waxa ka jira xaalad nabadgelyo-darro, xaalad muran la geliyay doorashooyinkii qaranka, xaalad gaabis la gaadhsiiyay hab-raacyadii (protocol-kii), iyo xaalad heshiisyo shisheeye oo dalku galay.

Waxa jira, Mudanayaal iyo Mudane Guddoomiye, xaalad hantidii qaranka ee ahayd asset-kii ummadda lahayd in si qayru-sharci ah loogu tagrifalay, annagoo u diyaargaroobaynay muddadii u dambaysay ee doorashada, taas oo ahayd in hantida ummadda si miisaan leh oo masuuliyadi ku jirto loo ilaaliyo.

Waxaynu ku jirnaa xaalad Miisaaniyadda Qaranka ee sannadka 2024, iyadoo muddadii sharcigu tilmaamay—gaar ahaan Xeerka Nidaamka Maamulka Maaliyadda Dalka, Xeer Lr. 75/2015—oo dhigaya in Miisaaniyadda Qaranka la keeno 30-ka Oktoobar, isla markaana labada bilood ee Nofeembar iyo Diseembar Guddida Dhaqaaluhu waajibaadkooda gutaan, ay dhacday xaalad sharci-darro ah oo awood ku-takri-fal lagu sameeyay, xeerkiina la jebiyay, miisaaniyaddiina Golaha la keenay iyadoo sannadkii dhammaaday.

Markaa xaaladahaas oo dhan oo ah xaalado kakan, isla markaana ah xaalad nabadgelyo-darro ah oo dalka ka abuuran, waajib bay inagu tahay annagoo ah Mudanayaashii Qaranka in aynu arrimahaas tallo iyo dood ka dhiibanno, dadkii ina soo doortayna u iftiiminno xaaladaha jira.

Mudane Guddoomiye, laga soo bilaabo sannadkii hore ee 2023 ilaa iminka, laf-dhabartii qarankan lahaa ee muddo 32 sano ah difaac iyo horumar samaynaysay, maanta waxaynu ognahay in ciidamadeennii lagu geliyay dagaal socday 10 bilood, wixii ka dhacayna aynu wada ognahay. Waxa keenay arrintaasi waxay ahayd fashil hoggaamineed oo dalka ku yimid, taas oo dhaawacday sharaftii iyo geesinimadii Ciidanka Qaranka.

Mudanayaal, shacab-waynaha Somaliland haddii uu maanta is-weydiiyo waxa keenay dhacdadaas, waxa cad in xaaladdii aynu ku jirnay aanay inoo saamaxayn in talaabo degdeg ah la qaado, maadaama Goluhu muujiyay deganaan iyo waayeelnimo, lana sugayay in hay'adaha qaranka warbixin naga siiyaan wixii ka dhacay ciidanka. Waxa maanta cadaatay in wixii dhacay aanay jirin meel loo raacay.

Anigoo ka mid ahaa dhowr iyo toban Xildhibaan oo constituency wadaag ah oo Madaxweynaha la kulmay, kana mid ahaa dadkii gurmadkii ugu horreeyay ka galay dhacdadii ka dhacday Laascaanood 25-kii Ogos, maalintii dhacdadaasba, anagoo ah 13 Xildhibaan oo Golaha Wakiillada ah oo gaadhay deegaanadii ay ciidamadu soo gaadheen, warbixintii aanu Madaxweynaha u gudbinay iyo falcelintii aanu kala kulannay waxay ahayd mid u eg mu'aamarad si ula kac ah loogu talagalay in ciidanka lagu jabiyo.

Maanta waxa muuqata in ka badan 300 oo ka mid ah geesiyadii qaranku lahaa ee Ciidanka Qaranka ah ay xorriyaddoodii waayeen, qaar badanna ku jiraan xaalado dhaawacyo halis ah. Markii baadhitaanno la sameeyay, waxa muuqatay in arrintaasi ahayd mid siyaasad ahaan loo qorsheeyay, xukuumadduna ku wiiqaysay saraakiishaas, qaar ka mid ahna maanta weli la haysto. Waxa cad in si ula kac ah loogu talagalay in loo khaarajiyo, balse Alle ka badbaadiyay.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, wixii halkaas ka dhacay ee la xidhiidha xaaladdii Goojacadde iyo Ciidanka Qaranka, waxa inagu ceeb ah annagoo ah qarankii aynu u dhaaranay iyo shacabkii aynu matalaynay in aynaan maanta awoodin inaan warbixin cad ka siino. Kuwii mu'aamaraadkaas gaystayna ilaa maanta wax ciqaab ah oo ay muteen lama marsiin.

Janankii haystay waa janankiisii, kii hawl-gelinayayna waa isla kii hawl-gelinaya maanta. Anigu waxaan u arkayay in ujeeddadu ahayd in rag si ula kac ah loogu talagalay in la "biriqsado", balse Alle ka badbaadiyay, raggiiina maanta gacanta lagu hayo. Taasi waxay ahayd mu'aamarad iyo siyaasad xumo ay xukuumaddu qorshaysay.

Mudanayaal, waxaynu ognahay in gobolkaas ay muddo dheer ka jireen tabashooyin ay xukuumaddu iska indha-tirtay, tallaabana ka qaadi weyday. Ugu dambayntiina, markii ciidamadeennii iyo shacabkii ay gadood ku dhex mareen, qaabkii loo maareeyay arrintaasi wuxuu ahaa mid aad u fool-xun, ilaa ay gaadhay in siddeed bilood si ula kac ah loogu talagalay in ciidanka halkaas lagu laayo, maalin walbana nin la dilo ama dhaawac culus la gaadhsiiyo.

Maanta waxa cad, anigoo Xildhibaan u ah constituency ka mid ahaa deegaanadii dhaawaca ugu badani ka soo gaadhay ciidamadaas, in kuwii dhaawacmay maanta dayacan yihiin, kuwii maxaabiista ahaa qoysaskooduna aanay helin wax tasiilaad iyo kaalmo dawladeed ah, kuwii dhintayna aanay jirin xuquuq ay haystaan.

Sidaas darteed, arrintaasi waxay ku soo ururtay inay ahayd siyaasad xukuumaddu lahayd, isla markaana ku guulaysatay inay baabi'iso hay'ad qaran oo ahayd hay'addii miisaaniyadda ugu badnayd dalka.

Waxaan intaas ku darayaa, Mudanayaal, in laba warqadood ay saraakiishu u qoreen Guddida Dhaqaalaha Golaha Wakiillada si wax looga waydiiyo Miisaaniyadda Ciidanka Qaranka, loona eego xuquuqdooda—haddii ay tahay mushaharkooda, daryeelkooda caafimaad iyo mid qoys. Waajib bay inaga saaran tahay inaan ogaano tirada ciidanka, inta dhimatay, inta dhaawacantay, iyo xaqiiqada dhabta ah ee meesha taalla. Hase yeeshee, Guddoomiye, waxa cadaatay in Janankii diiday inuu yimaaddo, taasina ay caddayn u tahay falalka musuqmaasuq iyo hanti-lunsi ee ka jira gudaha Ciidanka Qaranka.

Waxa la yidhi "*nin reer u weyn iyo islaan gabadh ka umulisay midna sida uu wax u ogyahay uma sheego*"—wixii meesha yaallayna waynu wada ognahay.

Difaacii qaranku lahaa ee aynu miisaaniyadda ku bixinaynay maanta waxa beddelay ciidan beeleedyo deegaannadayada ah, kuwaas oo dalka ilaalinaya. Taasi waa guuldarro iyo hoggaan-xumo qaran. Waxa ayaandarro ah in ciidamadan iskood isu abaabulay ee shaqadii qaranka haya aan wax xuquuq ah oo miisaaniyadeed loo qoondeyn.

Waxa cad in xukuumaddu qorshe ka lahayd inay ciidamadan u adeegsato siyaasad guracan oo abuureysa nabadgelyo-darro, maaddaama xuquuqdoodii la sugi waayay.

Anagu diyaar baanu u nahay, anigoo ka mid ahaa Xildhibaanadii kala shaqeeyay difaaca deegaannada iyo kaabista ciidamada madaniga ah, in ciidamadan lagu daro Miisaaniyadda Qaranka, lana siiyo xuquuq la mid ah tan Ciidanka Qaranka. Muddo shan bilood ah ayay si mutadawacnimo ah dalka u difaacayeen, dhimasho iyo dhaawacna ka soo gaadhay, iyagoo aan lahayn wax xuquuq ciidanimo ah. In maanta miisaaniyadda laga reebo waa fool-xumo iyo ihaano qaran.

Waxaan ognahay in masuuliyiin dawladda ka mid ahi ay ku talo galeen in dadkii ina soo doortay lagu dhex rido dagaallo iyo colaado qabiil, taas oo ah siyaasad gacan-ku-rimis ah.

Waxaan ka xunnahay wixii deegaannadaas ka dhacay, gaar ahaan magaalooyinkii dhibaatadu gaadhay. Waxay ahaayeen falal fool-xun oo aan la aqbali karin, kuwaas oo ay horseedeen siyaasad-xumo iyo dhaqan-xumo ay la yimaadeen kuwii halkaas maamulayay.

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxaan Golaha u soo jeedinayaa in ciidamadan madaniga ah ee dalka difaacaya si rasmi ah loogu daro Miisaaniyadda Qaranka, ama la qarameeyo si ay xuquuqdooda u helaan.

Waxaan sidoo kale xoojinayaa in arrimaha colaadaha la qorshaynayo ee is-hortaagga doorashooyinka aanay ahayn difaac qaran. Qofkii ku fashilmay difaaca Laascaanood ma noqon karo mid dal dhan difaacaya.

Xuduudda dalka in la gaadho annagu diyaar baanu u nahay, dadkuna taageero buuxda way siinayaan, balse maanta dalkan waa la baabi'iyay. Xildhibaan ra'yi dhiibta cadaw ayaa lagu tilmaamaa, halka kuwii dalka baabi'iyay aan lala xisaabtamin. Taasi waa masuuliyad-darro iyo matalaad-xumo.

Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa in Goluhu saaro Gudi Baadhiseed oo si cadaalad ah u baadha dhammaan dhacdooyinkaas foosha xun. Ilaahay wuu inagula xisaabtamayaa waajibaadkeenna qaran.

Sidoo kale, waxaan soo jeedinayaa in loo yeedho masuuliyiintii amniga ee ku fashilmay xilalkoodii, lana horkeeno Golaha si looga waraysto xaaladda dalka.

**Doorashooyinka:** Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, waxa jirta heshiis is-afgarad ah oo daneeyayaasha doorashooyinku wada aqbaleen, kaas oo deegaanada Somaliland qaarkood xal u arkayeen, una arkayeen badbaado ummadeed iyo mid qaran. Heshiiskaas, golayaashii ku shaqada lahaa waajibaadkoodii way ka soo dhalaaleen.

Waxaan aad uga xumahay in heshiiskaas ay xukuumadda, oo uu hoggaaminayo Madaxweynaha, ilaa maanta carqalad ku hayaan, dagaalna kula jiraan sida la wada ogyahay, isla markaana ay isku dayeen inay hay'adihii sharciga ku shaqada lahaa khilaaf ka dhex abuuraan.

Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtidu waa laba gole qaran oo sharaf iyo karaamo huwan, kuwaas oo haddii dareen soo kala dhexgalo si niyad-sami ah u dhamayn kara, wanaagna ka dhexeeyo.

Haddii aan runta la sheegin, wax ka xun baa la sheegaa. Khilaaf aan xukuumadda iyo ninka hoggaaminaya xukuumaddu abuurin oo dalka ka dhasha ma jiro. Ilaa maanta, heshiiskii sharciga ahaa ee ay golayaashu sharci mariyeen ayuu dabada hayaa.

Mudanayaal, haddii is-afgaradkii ummaddu gaadhay, haddii wixii lagu kala nabadgelyeeyay, haddii wixii aynu ka dareennay nabad iyo degaansho, haddii kii shalayto markii colaado halkan ka abuurmeen wax ka tari waayay aynu maanta dhaqdhaqaaqiisa iyo kibirkiisa u taagnaanno, waa mushkilad weyn.

Colaadihii lagu kala guntaday ee loo arkay in xal siyaasadeed laga gaadho, maanta aad baan uga xunnahay in dawladdu abuurayso xaalad kacsanaan iyo nabadgelyo-xumo ah. Dadka arrintaas ugu sacbinaya xukuumadda waxaan leeyahay: nin aan kuu furi doonin yaanu kuu rarin.

Kuwa leh waxba lama samaynayo, kuwa leh waxba dhici maayaan, kuwa leh heshiisyo ayaa la soo galayaa dalkuna waa la difaacayaa—wallaahi been bay sheegayaan. Marka ay isku yaacdo, nin waliba halkuu geli jiray baa la garanayaa.

Mudane Guddoomiye, xukuumaddu arrimaha doorashooyinka way ka meeraysanaysaa, diyaarna uma aha. Muddo-kordhin ayay qorshaysanaysaa, waxayna ku talagashay inay khilaaf siyaasadeed ka dhex abuurto golayaasha. Markii hore xisbiyada siyaasadda ayuu khilaafku marayay, maanta golayaashii ayay isku dayday, hase yeeshee uma suurtagelinayso inay golayaasha khilaaf ka dhex abuurto.

Waxaan halkan ka leeyahay: Madaxweynaha, xukuumaddiisa iyo intii kula talisay haddii ay dictatorship dalka ku hayaan, Siyaad Barre ayaa loo joogi lahaa oo la aqbali lahaa. Wakhtigan casriga ah ee la joogo, dictator nidaamkii dimuqraadiyadda iyo doorashooyinka baabi'inaya cid alaale cid kama aqbalayso.

Waxaan doonayaa in Goluhu waajibkiisa sharci ee saaran fuliyo. Kuwa leh Goluhu muxuu samaynayaa—Goluhu waajibkiisa sharci ayuu gudanayaa haddii uu shaqadiisa garanayo.

Guddoomiye, waxa masuuliyad-darro inagu ah, qaybna aynu ka nahay, in xubin ka tirsan Komishanka Doorashooyinka oo matalayay daneeyayaasha doorashada lagu eedeeyay. Xubintaas process sharci ah baa la mariyay, Madaxweynaha guddidii loo saaray jawaabtii way u celiyeen. In Madaxweynaha muddo saddex bilood ah u soo gudbin waayo Golaha arrintaas, waxa caddeyn u ah inaanu doorasho diyaar u ahayn, khilaafna abuurayo.

Isaga waxa ay ku tahay doorasho-diid iyo xaalad-abuur, innagana waxa ay inagu tahay masuuliyad-darro inaan maanta is-waydiin kari weyno oo aynaan awoodin inaan sharciga ku dabaqno. Waxa ahayd inuu arrintaas Golaha u soo gudbiyo, Goluhuna eego eedda lagu soo oogay ka dibna waajibaadkiisa guto.

Waxaan soo jeedinayaa in Goluhu waajibkiisa qaato, isla markaana degdeg loo horkeeno xubinta Komishanka Doorashooyinka ee la soo eedeeyay si Goluhu shaqadiisa u guto.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in Madaxweynaha uu saxeexo Xeerarkii Doorashada ee aynu ansixinay, Golaha Guurtiduna waajibkiisii ka soo gutay, kuwaas oo hadda Madaxweynaha horyaalla. Aad baan Shir-guddoonka ugu mahad-celinayaa sida ay waajibaadkooda sharci uga soo baxeen, waxaana rajaynaynaa in muddadii sharciga ahayd xeerkaasi ku soo dhammaado.

**Xoriyatul-Qawlka:** Mudane Guddoomiye, xoriyatul-qawlku aad iyo aad buu meel halis ah u marayaa. Waxaan soo jeedinayaa in hay'adaha ku shaqada leh loo yeedho oo arrintaas wax laga waydiiyo.

Mudane Guddoomiye, waxa dhacday in hantidii qaranku lahaa la iibiyay. Anigoo ah Guddoomiyaha Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka, waxaanu qornay waraaqo aanu u dirnay hay'adihii dhulkaas ku shaqada lahaa, annagoo ka dalbanay xogta

dhulka la iibiyay iyo inta miisaaniyadda qaranka uga soo xeroonaysa. Ilaa iminka wax jawaab ah kama hayno, taasina aad baan uga xunnahay.

Guddoomiye, Guddidu baadhis ay samaysay waxay ku ogaatay in dhul ku yaalla badhtamaha magaalada, kana mid ahaa dhulkii ugu qiimaha badnaa, oo halkii mitir labajibbaaran (square meter) ku fadhiya sagaal kun oo dollar, lagu xaraashay shan boqol oo dollar. Waxay u muuqataa in dawladdii si tabaabushaysan u iibinayso hantidii ummadda, meel kasta oo hanti taallana la iibinayo, iyada oo aan la garanayn halka ay hantidaasi ku dhacayso.

**Md. Cabdinaasir Yuusuf Cismaan (Qodax)** (12 Min, 54Sec) Shir-guddoonka, Mudanayaasha sharafta leh, shaqaalaha Golaha, bahda Saxaafadda iyo shacab-waynaha Somaliland, waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka, **ASC**.

Salaan ka dib, marka hore Ilaahay SWT waxaan uga baryayaa dadkeena iyo dalkeena inuu quluubteena mideeyo. Ilaahay waxaan ka baryayaa Somaliland inay noqoto mid jirta, joogta oo waarta, innagana quluubteena iyo xilka adag ee ummadda ina saaran inuu inaga dhigo kuwii garta oo guta.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, doodda xaaladda guud ee maanta Goluhu galay awgeed, marka hore waxaan u soo jeedinayaa Mudanayaasha sharafta leh, anigoo ixtiraamaya aragtida qof walba, in dooddeennu noqoto mid wax lagu curinayo, xal iyo xuluul lagu raadinayo, haddii Ilaahay yidhaahdo, oo aanay noqon dood yooyootan ah.

Waxaan soo jeedinayaa in xaaladda aynu ku jirno aynu kaga baxno midnimo, cagta isu joojino, isla markaana sidii Somaliland caanka ugu ahayd aynu arrimaha qabyada ah—gaar ahaan doorashooyinka iyo xeerarka—ugu dhamayno isku-soo-dhawaan, wadahadal iyo is-afgarad (consensus).

Waxaan halkan hambalyo iyo bogaadin uga dirayaa dhammaan Ciidamada Qaranka Somaliland qaybahooda kala duwan, gaar ahaan Ciidanka Qaranka oo sannadkii u dambeeyay muujiyay naf-hurnimo iyo adkaysi ay Somaliland oo dhan ka markhaati kacday.

Wixii ciidanka ka xumaaday waa wax Somaliland oo dhan ka xumaaday. Dagaalkii iyo dabkii ka dhacay Magaalada Laascaanood innaguba wax buu ina yeelay, dadkeenii reer Laascaanoodna wax buu yeelay. Maanta labadeenuba waynu isu baahanahay, meelna kama kala maarmayno.

Waxaan xoojinayaa, maaddaama xaaladdu maanta degan tahay, in Guddoomiyuhu hormuud inoogu noqdo sidii qalbiga iyo nabadda shacabka Gobolka Sool loo soo celin lahaa, xukuumadduna ka shaqayso. Dadkaasi waa dadkeennii, amni iyo dawladnimo la'aan ayaanay ku jiraan, innagana ka maarmi mayno.

Anigu waxaan tagay gobollada Bari, indhahaygana waxaan ku soo arkay xaaladda ka jirta. Waddooyinka isu socda waa kuwo dhaadheer oo daal badan, taasina waxay marag u tahay inaan kala maarmi karin.

Sidaa darteed, anigoo soo jeedinaya, waxaan ku boorrinayaa Guddoomiyaha inuu hormuud u noqdo wanaajinta xaaladda, innaguna waan u baahanahay iyagana way inoo baahan yihiin. Sida maah-maahda Soomaalidu tidhaahdo: *"Colka wadhaf ma lagu dayay"*—wanaag, is-faham iyo wadahadal aynu ku dayno.

Waxa kale oo aynu ognahay xaaladda amni ee dalku ku jiro. Waxa la sii daayay ku dhowaad afar boqol oo qof, kuwaas oo qaar ka mid ahi dhibaato amni ku hayaan suuqa iyo xaafadaha. Labadii toddobaad ee u dambeeyay dilal ayaa ka dhacay caasimadda Hargeysa. Sidaa darteed, waxaan ciidanka booliiska u soo jeedinayaa in arrintaas si feejigan loo wajaho.

Mudanayaal iyo Marwooyin, dalkani wuxuu soo maray toddoba doorasho, saddex Madaxtooyo, laba Baarlamaan, iyo saddex Doorasho Gole Deegaan, dhammaantoodna si nabad ah ayay u dhaceen. Markasta oo doorasho timaaddo khilaaf iyo muran waa yimaaddaa, balse caado ayay inoo ahayd in daneeyayaasha doorashadu isu yimaadaan, ka wada hadlaan, isla markaana heshiis lagu dhammeeyo.

**Tan maanta**, waxaan soo jeedinayaa in daneeyayaashu sidii caadada ahayd isu yimaadaan oo ay ka wada arrinsadaan. Muddada ka hadhsan wakhtigii loo muddeeyay waa wax ka yar 10 bilood, xeerkeediina, Mudane Guddoomiye, weli hadal baa ka taagan. Maalmihii u dambeeyay Shir-guddoonnadu way ku jireen, sidaa awgeed waxaan jeclaan lahaa inaad warbixin naga siiso halka uu wada-hadalku marayo; haddii uu istaagayna aynu ogaano, si wejigii kale ee looga gudbi lahaa looga arrinsado. Haddii wada-hadalku socdana, inta ka horaysa 7-da bisha, xal waara oo lagu wada qanco inuu yimaado ayaan idinku guubaabinayaa.

Labada Gole—Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilladu—waa Gole Baarlamaan. Golahaas Baarlamaan weli xeer-hoosaadkii ay ku wada shaqayn lahaayeen waa qabyo. Dhibta ina haysata ee khilaafku ka soo bilaabmaana waxa weeye dastuurkeenna oo ilaa labaatankii sano ee u dambeeyay aan wax ka beddel lagu samayn. Sidaa darteed, Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedin lahaa in xeer-hoosaadkii la dhamaystiro. Waxa kale oo aan soo jeedinayaa, maaddaama aan ilaa hadda la samayn xeerkii Golaha Guurtida lagu soo dooran lahaa, in aynu curinno xeerkii golahaasi ku iman lahaa.

Mudane Guddoomiye, waxaan Komishanka Doorashooyinka u soo jeedinayaa—iyagoo ah hay'adda ugu sarreysa ee doorashada qaabilsan—inaanay ka meeraysan masuuliyadda saaran. Waa inay la yimaadaan qorshihii ay doorashada ku qaban lahaayeen. Masuuliyaddaas iyagaa qaatay; haddii aanay qaban karaynna waa inay si cad u muujiyaan. Haddii ay qabanayaan, waa inay ummadda u caddeeyaan, kaadhadhkii soo hadhayna la qaybiyaa, road map-kii doorashadana la diyaariyaa. Haddii wax ka qabyo yihiinna waa

inay ummadda u sheegaan. Sidaa darteed, Komishanka waxaan xoojinayaa inay shaqada qaran ee loo igmaday caddeeyaan, bayaamiyaan, oo la yimaadaan.

Dalka waxaynu ku iib-gayn karnaa waa doorasho; dalka waxaynu ku xasilin karnaa waa doorasho; dalka waxaynu ku horumarin karnaa waa doorasho. Dadkeenna maanta way werwersan yihiin, mar kasta oo khilaaf yimaadana werwerku wuu sii kordhaa. Kii yimaadaba waa kii kale. Kii ku guulaysta waanu garab-galaynaa oo waanu la shaqaynaynaa, balse waxa ugu muhiimsan waa inay doorasho ka dhacdo dalka, haddii Ilaahay nafta nagu simo, inshaa'Allaah. Waana rajaynayaa inay ka dhici doonto.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, saddex iyo soddon sano ayaynu u halgamaynay ictiraaf caalami ah. Himiladii aynu lahayn ee xornimadeenna 1991-kii kula soo noqonay waligeed inagama dhammaanayso. Maanta waxa jirta il bidhaamaysa oo leh yididiilo iyo rajo, taas oo inoo abuuri karta in dalal kale ku dhiirradaan. Sidaas darteed, waxa loo baahan yahay in is-fahamka innaga iyo Itoobiya ina dhex maray si qaran oo il qaran leh loo eego, si ay u noqoto mid mustaqbalkeenna iyo aayaha dambe si qoto dheer loogu lafaguro—haddii ay dan iyo khasaare inoo keento labadaba.

Waxaan rajaynayaa in arrintaas si qaran loo eego; haddii ay dan inoo tahayna aynu wada taageerno marka golahani wakhtigiisa gaadho, haddii ay halaag iyo masiibo inoo horseedayso-na aynu ka digtoonaano, haddii Ilaahay yidhaahdo. Himilada ummaddani leedahay waligeed inagama dhammaanayso; ictiraafku waa waxa aynu u baahanahay, maalgashigu wuu ku xidhan yahay, macaamilkuna wuu ku xidhan yahay, guulna wuu horseedayaa. Ilaahay waxaan ka baryayaa inuu inoo hirgeliyo, innagana aynu noqono kuwii ka shaqeeya.

Is-fahamka innaga iyo Itoobiya ina dhex maray waxa ka cad in dad badan oo aanu raalli ka ahayn ay jiraan, gaar ahaan Soomaaliya. Madaxweynaha Soomaaliya masaajidada ayuu kaga khudbadeeyay heshiiskaas oo wuu ka soo horjeedaa; cadaw badan baa iska soo kaashaday. Haddaba aynu isweydiinno waxa ay ka qaylinayaan—waa madax-bannaanida. Sidaas darteed, aynu difaacno oo adkayno.

Waxaan soo jeedinayaa in doorkii odayaasha, ganacsatada iyo salaadiinta—kuwaas oo ahaa kuwii isku-soo-dhaweynta—uu maanta ka maqan yahay. Waxaan u soo jeedinayaa inay saxaafadda iska dhaafaan is-dhaafsiga hadalka, balse ay noqdaan kuwii dadka iyo dalka mideeya, wanaagna u horseeda, kana shaqeeya sidii ummaddu isu soo dhawaan lahayd oo wadajir u noqon lahayd.

Saxaafaddana waxaan u soo jeedinayaa in aan la sii dayn wax kasta oo ummadda kala fogaynaya, dhinac kasta ha ka yimaadee; halkii, wixii ummadda anfaca ha la sii daayo, wixii aan maanta anfacayna ha lagu kala qaybin ummadda. Sidaas ayaan u leeyahay, maaddaama aynu ku jirno xaalad adag oo cadawgeennu il inagu hayo, gudahana la doonayo in aynu kala tafaraaruqno si markaas inaga faa'iidaysto. Sidaa awgeed, cid kasta oo xil haysaa—xukuumad, goleyaal, odayaal iyo saxaafad—masuuliyad baa saaran, qof

walbana waa inuu taxaddaraa. Midnimo iyo wadajir ayaanu u baahanahay, taasna waa in aynu xoojinaa.

Waxaan ku soo ururinayaa, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, in arrimaha inaga qabyada ah ee ina horyaalla—xeerarkuna ka mid yihiin—aynu ku dhamaynno wadajir, midnimo iyo wada-hadal, sidii Somaliland ahaan jirtay. Shacabka reer Somaliland meel kasta oo ay joogaan waxaan u soo jeedinayaa inaynu ka wada shaqayno midnimada. Goleheenna waxaan ka codsanayaa in aragtiyaha ka soo baxayaa noqdaan kuwo xal iyo xuluul lagu raadinayo, ee aanay noqon kuwo dabka baxaya baasiin ku sii shidaya. **Waad mahadsan tihiin. WSC.**

**Md. Mubaarik Muuse Ismaaciil** **(06 Min, 51 Sec)** Aad iyo aad baad u mahadsan tihiin Mudane Guddoomiye. Labadii Xildhibaan ee iga horreeyay waxay si qoto dheer u taabteen arrimo badan oo xasaasi ah oo saamayn toos ah ku leh jiritaanka iyo mustaqbalka qaranka, kuwaas oo ay ka mid yihiin arrimaha doorashooyinka, xaaladda ciidamada, iyo guud ahaan xaaladda siyaasadeed, amni iyo bulsho ee dalka.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaasha Golaha, anigu waxaan rabaa inaan si gaar ah u taabto laba qodob oo aan u arko inay yihiin kuwo aad u muhiim ah, isla markaana si toos ah ula xidhiidha hadalkii aad adigu hore u soo jeedisay. Waxaad sheegtay in waddanku u baahan yahay nabad, is-afgarad iyo xal qaran oo meel walba laga gaadho, si ummadda Somaliland ay uga heshiiso khilaafaadka jira, isla markaana loo ilaaliyo midnimada iyo xasilloonida dalka.

Arrintaas, Mudane Guddoomiye, cidina kama doodayso, waayo ummadda reer Somaliland—ha noqoto aqoonyahan, ganacsato, waxgarad, cuqaal iyo guud ahaan bulshooyinka kala duwan—marar badan ayay muujiyeen bisayl siyaasadeed iyo karti ay ku dhisaan nabad, isla markaana ay ku xalliyaan khilaafaadkooda wada-hadal, tanaasul iyo isu-tanaasul. Taariikhda Somaliland waxa si cad uga muuqata in nabaddu tahay tiirka ugu weyn ee jiritaankeeda.

Si kastaba ha ahaatee, Mudane Guddoomiye, waa in si dhab ah loo fahmaa in nabad iyo xal la gaadhi karo oo keliya marka ay jirto xukuumad sharci ku fadhida talada dalka, u hoggaansan dastuurka, dhegaysatana cabashada iyo talada ummadda. Nabaddu ma noqon karto mid lagu dhiso xoog, cabsi, rasaas iyo cagajuglayn. Maanta se, xaqiiqadu waxay tahay in xukuumadda talada haysaa gebi ahaanba muujisay inay tahay xukuumad xal diid ah.

Markii shacabka Somaliland ay si nabad ah uga mudaharaadeen arrimaha la xidhiidha doorashooyinka iyo xuquuqdooda dastuuriga ah, jawaabtii xukuumaddu bixisay ma noqon mid wadahadal iyo xal ah, balse waxay noqotay rasaas, xoog iyo cabburin. Cawaaqibkii ka dhashay arrintaasna dhammaanteen waynu wada ognahay; Somaliland maanta waxay lumisay gobol dhan, arrintaasina waxay saamayn culus ku yeelatay Gobolka

Sanaag iyo gaar ahaan Magaalada Laascaanood, oo ahaa laf-dhabartii midnimada iyo jiritaanka Somaliland.

Mudane Guddoomiye, innagoo og duruufahaas halista ah, innagoo og in Madaxweynaha iyo xukuumaddiisu aanay diyaar u ahayn qabsoomid doorasho xor iyo xalaal ah, innagoo og in soo jeedintii iyo dadaalkii ay odayaasha dhaqanka iyo nabadayntu wadeen si badheedh ah loo laalay, isla markaana aan illaa hadda wax jawaab ah laga bixin xubintii Komishanka Doorashooyinka ee si cad loo eedeeyay—iyadoo muddadii doorashaduna si xawli ah u sii gaabanayso—waxaas oo dhami waxay ina tusayaan khatar weyn oo soo wajahday nidaamka dawladnimo iyo dimuqraadiyadeed ee dalka.

Sidaa darteed, Mudane Guddoomiye, Golaha Wakiilladu waa in uu qaataa kaalintiisa dastuuriga ah. Golahan waxa laga sugayaa go’aanno adag, masuuliyad leh, oo lagu ilaalinayo sharciga, dastuurka iyo danaha ummadda. Xukuumaddu maanta uma muuqato mid u diyaarsan doorasho; waxa keliya ee ay waddo waa cagajuglayn, cabburin iyo xadhig sharci-darro ah.

Xaaladda saxaafadda dalka ka jirta waa mid la wada ogyahay; xorriyaddii hadalka iyo warbaahinta si ba’an ayaa loo wiiqay. Sirdoonkii Qaranka, oo waajibkiisu ahaa ilaalinta amniga qaranka iyo la-dagaallanka khataraha dibadda iyo gudaha, waxa uu maanta ku mashquulsan yahay xadhigga suxufiyiinta. Kiiskii ugu dambeeyay ee saxafiga Ilig in la horkeeno Maxkamadda Ciidamada waa xeer-jabin cad, kana hor imanaysa dastuurka iyo shuruucda dalka u yaalla.

Mudane Guddoomiye, innagoo og in miisaaniyaddii dhawaan la ansixiyay ay ahayd mid dastuur-jab ah, innagoo og in Madaxweynaha si bareer ah u jebiyay dastuurka isagoo xeer uu Golahani ansixiyay si sharci-darro ah ugu gudbiyay Golaha Guurtida, innagoo og in Hantidhawrka Guud muddadii xilkiisu dhammaatay haddana weli sii shaqaynayo—dhamaan falalkaas waxay muujinayaan in nidaamkii sharciyeed la tirtiray, isla markaana aan wax xisaabtan ahi jirin.

Arrimahaas oo dhan waxay u baahan yihiin in Golahan, oo ah hay’adda ugu sarreysa ee sharci-dejinta, isla markaana ay ummaddu dooratay, uu qaato go’aanno adag oo cad, si loo badbaadiyo qaranka loogana hortago in dalku u sii jeesto burbur iyo qalalaase siyaasadeed.

Ugu dambayn, Mudane Guddoomiye, heshiiska Itoobiya oo bil ka badan laga joogo weli wax faahfaahin ah lagama hayo. Xitaa Golaha Wasiirrada iyo Madaxweyne-ku-xigeenka lama wadaagin xog rasmi ah. Taasi waa masuuliyad-darro muuqata oo ku dhacday qaranka, isla markaana ka hor imanaysa hufnaanta iyo isla-xisaabtanka dawladnimo.

Sidoo kale, innagoo og in aanay sinnaan ka jirin sida gobollada dalka u wadaagaan saami-caddaaladeedka Miisaaniyadda Qaranka, innagoo og in miisaaniyaddan la soo qoray aanay ahayn mid u sinnayn dhammaan gobollada dalka—iyadoo ku dhowaad 90% Miisaaniyadda Qaranku ay ku baxdo Gobolka Maroodi-Jeex, halka gobollada Togdheer,

Awdal, Sanaag iyo Sool ay wadaagaan wax aan ka badnayn 10% Miisaaniyadda Qaranka—arrintaasi waxay si cad u muujinaysaa caddaalad-darro baahsan oo ka jirta maamulka kheyraadka qaranka.

Mudane Guddoomiye, annagu waxaanu rabnaa in waddankan la badbaadiyo. Maaddaama aanay maanta ka jirin cadaalad dhab ah, maamul daahfuran iyo xukuumad ku socota jidkii toosnaanta, waxaan aaminsanahay in la qaato go'aanno adag oo ku saabsan dhaliilidda, la-xisaabtanka iyo ka-hortagga xukuumadda maanta jirta.

Sidaa darteed, waxaan si cad u soo jeedinayaa in go'aanno adag laga qaato xukuumadda Somaliland ee maanta jirta iyo hoggaankeeda, Mudanayaasha Golahana waxaan ugu baaqayaa inaynu sida ugu dhakhsaha badan uga tashanno xaaladda dalka, isla markaana aynu qaadanno go'aan adag oo masiiri ah oo ku saabsan mustaqbalka Somaliland.

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac (05 Min, 39 Sec):** Waxaan ugu horrayn xusayaa in wixii dalka ka dhacay laga bilaabo 25-kii Agoosto 2023 ilaa maanta aanay xukuumaddu wax war-celin ah ama hadal rasmi ah ka soo saarin. Arrimahaas waa kuwo culus oo taabanaya jiritaanka qaranka, ammaanka dalka, iyo mustaqbalka Ciidanka Qaranka ee aynu muddo 23 sano ah si adag u soo dhisaynay. Sidaa darteed, waxa lagama maarmaan ah in ummadda Somaliland loo sheego xaqiiqada wixii dalka ka dhacay, wixii ku dhacay Ciidankeennii Qaranka, iyo halka ay wax marayaan maanta.

Ilaa maanta, ma jirto cid si cad uga hadashay ama wax iska waydiisay arrintaas, taasina waxay muujinaysaa dayac iyo masuuliyad-darro ka muuqata hay'adihii ay waajibka ku ahayd in ay ummadda la wadaagaan xogta. Sidaas awgeed, anigu waxaan qabaa in arrintaasi ay tahay mid mudan in si rasmi ah wax looga waydiiyo xukuumadda iyo hay'adaha khuseeya.

Mudane Guddoomiye, anigoo arrintaas ka duulaya, waxaan soo jeedinayaa in hay'adihii ay shaqada ku lahaayeen dhacdooyinkaas—kuwa amniga, difaaca iyo taliska ciidanka—Golaha Wakiillada halkan looga yeedho, si wax looga waydiiyo wixii ku dhacay qarankeennii. Wixii dhacay waa jab qaran, waana in Goluhu kaalintiisa dastuuriga ah ka qaato la-xisaabtanka arrintaas.

Waxaynu wada ogsoonahay in sannad ka hor xilligaan oo kale ay jireen shacab si nabad ah u mudaharaadayay, gaar ahaan shacabka reer Laascaanood. Waynu wada ognahay wixii lagu sameeyay dadkaas, in rasaas lala dhacay, isla markaana dad shacab ah la dilay laguna dhaawacay. Markay arrintu halkaas maraysay, waxa dawladdu ogolaatay in ciidamo shisheeye oo hubaysan, calamo kale sitana, ay soo galaan dalka Jamhuuriyadda Somaliland. Taasi waxay ahayd dambigii labaad ee ay xukuumaddu gasho, kadib falalkii lagu dilay shacabka rayidka ah.

Ciidamadaas shisheeye waxay galeen Magaalada Laascaanood, wixii halkaas ka dhacayna waa wax la wada ogyahay, loona baahan yahay in si cad loo baaro. Intaas kuma ekaan, balse ciidamadu waxay ku fideen Laascaanood iyo qaybo ka mid ah Gobolka Sanaag Bari.

Dhacdooyinkaas oo dhan waxay si rasmi ah u dhaceen 25-kii Agoosto, waana dhacdooyin taariikhi ah oo culays weyn ku reebay qaranka.

Arrintaasi waxay ahayd in si degdeg ah wax la iska waydiiyo, Goluhuna uu ummaddii soo dooratay uga warramo wixii dhacay, xaqiiqada dhabta ah, iyo tallaabooyinka laga qaaday ama laga qaadi doono. Nasiib darro, taas ilaa maanta ma dhicin.

Mar horeba waxa la soo jeediyay in Goluhu saaro **Gudi Baadhiseed** oo madaxbannaan, kana kooban xubno Golaha ka tirsan, si ay u soo waraystaan sida ay wax u dhaceen, wixii ku dhacay Ciidanka Qaranka, tirada dhimashada, tirada dadka la qabtay ama la waayay, iyo gaar ahaan xaaladda ciidamada weli ku sugan Magaalada Oog, kuwaas oo aan ilaa maanta si rasmi ah looga hayn war cad oo ku saabsan xaaladdooda nololeed iyo mid amni.

Waxaynu sidoo kale ka warqabnaa in Miisaaniyadda Qaranka ee sannadka 2024 ku dhowaad 50% loo qoondeeyay dhinaca difaaca. Arrintaasi waxay u baahan tahay in si qoto dheer loo fahmo, maaddaama aynu ognahay xaaladda Ciidanka Qaranka ee maanta jirta, iyo su'aasha ah: **cidda maanta difaacaysa dalka iyo sida loo maamulayo dhaqaalaha difaaca**.

Sidaa darteed, Mudane Guddoomiye, waxaan si cad u soo jeedinayaa in Ciidanka Qaranka loo daro mushahar ku filan oo ku habboon duruufaha ay ku shaqaynayaan, si loo xoojiyo niyaddooda, loona ilaaliyo karaamadooda. Sidoo kale, ciidamada madaniga ahna waa in mushaharkooda lagu daraa Miisaaniyadda Qaranka ee sannadka 2024, si loo xaqiijiyo cadaalad, isku-dheelli-tirnaan, iyo adkaynta hay'adaha amniga ee dalka.

**Md. Saleebaan Nuur Warsame Faarax (Food)** – (10 Min, 07 Sec) **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Waad mahadsan tahay, Mudane Guddoomiye. Waxaan salaamayaa Mudanayaasha Golaha iyo shaqaalaha Golaha.

Maanta waxaan ka hadlaynaa xaaladda guud ee dalka, taas oo ah xaalad muuqata oo indhaha laga wada arki karo, sida qorraxda. Sidaa darteed, waa arrin aynaan ka waaban karin inaan si cad uga hadalno, si aynu aragtideenna isu sheegno, una fahamsiinno dadkii ina soo doortay in aynu la soconno xaaladda jirta.

Xaaladda guud ee dalka qodobo badan ayay ka kooban tahay. Waxaan si buuxda u taageersanahay sida ay Xildhibaanadii hore u taabteen arrinta xaaladda guud ee Ciidanka Qaranka, loona baahan yahay in xog laga hayo, lagana xisaabtamo Wasaaradda Gaashaandhigga wixii dhacay dagaalkii 25-kii Agoosto iyo qaabkii loo maareeyay.

Waa lama huraan in arrintaas laga xisaabtamo. Dalkan iyo dadkan masuuliyad baa inaga saaran, waxaana naloo soo doortay annagoo ah Golaha Sharci-dejinta. Dadka reer Somaliland waxay inaga sugayaan inaan caddeyno wixii dalka ka dhacay, una bandhigno xaqiiqada jirta.

Waxaan boqolkiiba boqol taageersanahay Xildhibaanadii hore ee soo jeediyay in si buuxda loo baadho wixii dhacay 25-kii Agoosto. Waxaan halkan ka salaamayaa Ciidanka Qaranka Somaliland.

Waa run in marka dagaal yimaaddo ay dhimasho iyo dhaawac jiri karaan, balse maanta waxaynu arkaynaa ciidamo badan oo dhaawac ah, cabashooyin badanna ka imanayaan daryeelkooda. Waxa jira askar badan oo u baahan daaweyn dibadeed, balse qaar ka mid ah waa laga gaabiyay ama cabasho ayaa ka jirta.

Arrintaas waxaan jeclaan lahaa in Gudi Baadhiseed ay kala xisaabtanto, si wixii dhaawac iyo daryeel ah ee jira loo ogaado loona saxo.

Arrimaha saxaafadda, Somaliland waxay leedahay saxaafad xor ah. Wixii aan qaranimada wax u dhimaynin, in si khaldan loo xidho ama waddo khaldan loo maro waa arrin aynu ka soo horjeedno, sida ay Xildhibaanadii horeba sheegeen.

Waxaan is dul taagayaa heshiiskii uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland galay, kaas oo ilaa maanta mugdi ku jiro, aan golayaasha la horkeenin, aan si cad shacabka loogu sheegin, isla markaana xan badan ay ka jirto. Waxaan codsanaynaa in heshiis kasta oo Jamhuuriyadda Somaliland gasho ama uu Madaxweynuhu galo lagu horkeeno Golaha Sharci-dejinta, si xaqiiqada iyo nuxurka heshiiska loo ogaado, loona gudbiyo shacabka.

Waxaan sidoo kale taabanayaa muranka siyaasadeed ee dalka ka jira. Dadka reer Somaliland maanta waxay ku sugan yihiin xaalad aad u adag; sicir-bararkii, shaqo-abuurkii iyo adeegii bulshada waa la illaaway. Wasiir kasta oo xil loo dhiibay maanta shaqadii uu lahaa ma hayo, balse wuxuu ku mashquulsan yahay muran siyaasadeed.

Wasaaradihii shaqadoodii waa laga seexday, horumarkii iyo adeegii ummaddana waa la dayacay. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in xukuumadda iyo wasaarad kasta lala xisaabtamo, maaddaama aynu nahay Golaha Sharci-dejinta.

Haddii aynu ka aamusiinno, ka gaabinno ama ku kala qaybsanno xaaladda maanta taagan, waxaynu ku dambayn doonnaa inaan mar walba hoos u sii soconno. Sidaa darteed, waxaan qabaa inay xaq inoogu tahay inaan wasaarad kasta u yeedhno, wasiirka masuulka ahna si cad loola xisaabtamo wixii uu qabtay iyo wixii laga sugayay.

Gobollada Bariga, xaaladda reer miyiga, Ciidanka Qaranka iyo ciidamada deegaanka—dhamaantood maanta way dayacan yihiin, xogtooduna ma cadda. Taasi waa dayac muuqda.

Muranka siyaasadeed ee maanta jira wuxuu gaadhay heerkii ugu sarreeyay, ilaa Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiillada laftooda uu gaadhay. Taasi waa khatar weyn oo u baahan in si degdeg ah wax looga qabto.

Waxaan u malaynayaa in daadkii muranka siyaasadeed ee waddooyin badan soo marayay—waxgaradka reer Somaliland, baayac-mushtarka, culimaa’udiinka, dhalinyarada,

aqoonyahanka iyo cid kasta oo ay soo mareen—oo Madaxweynaha lagula taliyay nabad iyo isu-soo-dhowaansho, waxba laga waayay.

Maanta murankaasi waxa uu dhex yaallaa labadeenna Gole. Waxaynu u baahanahay labadeenna Gole in aynu guntiga u xidhanno oo u giijisanno, Shir-guddoonna ahaanina aad u qaabishaan si nidaamsan. Tani waa halkii ugu dambaysay ee murankaasi istaagi lahaa; haddii uu labada Gole inala dhaafo, waa halkii ugu dambaysay, sida aan is leeyahay.

Ilaahay waxaan ka baryaynaa in kan wanaag iyo nabadgelyo keena uu Ilaahay inooga dhigo. Qofna ma jecla in dadkiisa iyo dalkiisa xumaan ku timaaddo ama hoos u dhac ku yimaaddo. Hase yeeshee, haddii cidii masuuliyadda lahayd ay ka gaabiso, meel fog bay inala maraysaa. Maanta murankii labada Gole, ummadda Somaliland ee aynu ka masuulka nahay innaga ayay ina eegaysaa; labada Golena waa meesha ugu dambaysa. Sidaa darteed, waxaan leeyahay aynu noqono kuwo ka badbaadiya Somaliland muranka labada Gole.

Ictiraafka Somaliland waynu jecel nahay, dalkeenuna ha noqdo qaran ictiraaf hela. Taasi waynu u baahanahay. Laakiin ka hor intaanad dunida u tagin, waa inaad marka hore ummaddaada mideysaa—sharci ahaan ku mideysaa, midnimo ku mideysaa, horumar ku mideysaa. Marka midnimada reer Somaliland iyo dhaqankeena la helo ayaad dawada aad ku heli karto ictiraaf adduunka u sheegi kartaa. Ummaddeennu maanta muran siyaasadeed oo dheer ayay ku jirtaa.

Waxaynu u baahanahay innagoo ah kuwa ugu horreeya ee wax toosiya, ee sharciga ku mideeya. Waxa la yidhi: *"Geela duqdiisu durdurisay aarankiisana maxaad u malayn?"* Haddii Madaxweynuhu abuuro muran, abuuro iska-hor-imaad, diido ergo kasta oo u timaadda, waa in sharciga lagu soo dabaalaa. Qof kastaa—Xildhibaan ha noqdo, Wasiir ha noqdo, ama Madaxweyne ha noqdo—waa inuu ka baqaa sharciga. Haddii aan sharciga laga baqan, wax aynu isugu iman karnaa ma jiri doonaan.

Waynu u baahanahay dalkeenna inuu yeesho wax kasta oo wanaag ah. Laakiin waxaan leeyahay, Madaxweynaha waa in maanta la horkeenaa Gole isla-xisaabtan ah, lagulana xisaabtamaa, iyada oo aan laga gabban. Haddii taas la waayo, muranku wuu inala sii tagayaa, qof walbana si gooni ah ayuu u qaadanayaa.

Masuuliyad baa saaran Madaxweynaha; waa la soo doortay, ummad baa soo dooratay, cod buu ku yimid. Taasi waxay u baahan tahay masuuliyad. Dadkii qaylinayay, murankii jirayna maanta anaga iyo golayaashii kale ayuu na soo gaadhay. Waxaynu u baahanahay in arrintan si degdeg ah wax looga qabto. Madaxdhaqameed waa laga quustay, baayac-mushtarna waa laga quustay; sidaas darteed, labadeenna Gole ayaa awood u leh inay xakameeyaan xaaladda maanta dalka marayso—meeshii ugu dambaysay ayay maanta maraysaa.

Waxaan soo jeedinayaa in arrimaha miisaaniyadda Ciidanka Qaranka si gaar ah hoos loogu eego, inkasta oo Guddidu ay gacanta ku hayso.

Waxaynu u baahanahay in ciidamada madaniga ah xaaladdooda meel la saaro. Ciidan baa la ururiyay, waana ciidan madani ah. Madaxweynaha laftiisu wuu sheegay oo yidhi waanu taageersannahay ciidamada madaniga ah, isagaana bilaabay. Haddaba, miyaanay mid walba iska samaysan karin ciidan kale? Kuwa hadda jira talo looma hayo, kuwa samaysmi doonana talo looma hayo.

Annagu waa Golihii Sharci-dejinta; haddii aynaan sharci ka soo saarin, oo aan ciidamadan urursan, hubaysan, ee jooga meel ku habboon la saarin, mushkilad bay dhalin karaan. Waa in la nidaamiyaa, la habeeyaa, loona sameeyaa sharci cad. Haddii Madaxweynaha yidhi waan taageernay ciidankan, waa inuu sharci u soo saaraa, wareegto cadna ku qeexaa waxa uu ula jeedo. Ciidan aan meel lagu xaddidin wax kasta ayay samayn karaan, meel kasta ayay u duuli karaan. Xagee baynu ku qoraynaa? Qaar kalena way samaysan karaan.

Waxaan leeyahay, haddii la doonayo midnimada dalka, wanaaggiisa iyo horumarkiisa, muranka siyaasadeed iyo arrimaha doorashooyinku waa in si sharci ah loo xalliyo. Horumarinta Somaliland maanta way ka quusatay, shaqo-abuur way ka quusatay, warshado iyo qurux dibadeed way ka quusatay. Maanta waxay maraysaa halkii ugu dambaysay. Sidaa darteed, annagoo Xildhibaano ah iyo Shir-guddoon ahaanba, waa inaan si wadajir ah uga guntanno, sharciguna waxa uu ina farayo aynaan ka baydhin. Qof kasta oo khaldama—ha noqdo Madaxweyne, Wasiir ama Wasaarad—waa in si degdeg ah loola xisaabtamaa. **Aad iyo aad baad u mahadsan tihiin.**

**Md. Maxamed Xuseen Maydhane Obsiiye** (08 Min, 37 Sec) **Bismillaahi Raxmaani Raxiim.** Marka hore, Mudane Guddoomiye, Mudanayaasha Golaha, iyo dhammaan bahda saxaafadda ee kulankan goob-joogga ka ah, waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka: **Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.**

Run ahaantii, dooddan aynu maanta ku jirnaa waa dood aad u baaxad weyn, dood masiiri ah, dood taabanaysa jiritaanka, midnimada iyo mustaqbalka Somaliland. Anigoo aan si buuxda ugu diyaarsanayn hadalkan, haddana anigu masuuliyad ayaan iska saarayaa inaan aragtidayda iyo wixii qalbigayga ku jira si daacad ah u cabbiro.

Mudane Guddoomiye, waddankan maanta halka uu marayo, anigu waxaan qabaa inuusan halkaas ku sii socon karin. Haddii aanay badbaadin Golayaasha Sharci-dejintu—Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida—marka runta la wada hadlo, dastuurkii aynu ku heshiinnay waa laga leexday, si bareer ahna waa loo jebiyay. Ciddii talada dalka haysay waxay ku kacday falal u dhigma khiyaamo qaran, waxaana muuqata in waddankii loo wado jid kala-qaybin iyo burbur.

Soomaalidu waxay tidhaahdaa: **"Ilaahay hortii waa lagarmoogaystaaye."** Marka aad aragto Laascaanood oo baxday, iyadoo aan cidna lagula xisaabtamin wixii sababay, haddana maanta aad aragto in Galbeedkii Somaliland Itoobiya laga iibinayo—laguna dhawaaqayo in beys milatari la siiyay, deked la siiyay, dhul iyo bad isku xidhan la siiyay—

taasi ma aha arrin fudud, ee waa dastuur-jabin cad iyo khiyaamo qaran oo si toos ah uga hor imanaysa wixii ummaddani ku heshiisay.

Arrintaasi waxa si cad u caddeynaya Qodobka 1aad iyo Qodobka 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, marka lala akhriyo Qodobka 127aad, kuwaas oo si aan mugdi ku jirin u sheegaya in midnimada dhulka, badda iyo qarannimada Somaliland aan la kala dhantaali karin, isla markaana aan cid gaar ahi go'aan ka gaadhi karin.

Sida lagu heshiiyay, talada qaranku waxay ahayd talo-wadaag, isla-xisaabtan iyo in hay'adaha sharci-dejintu ka qayb qaataan go'aamada masiiriga ah. Golayaashuna xataa awood uma laha inay xeer ka soo saaraan arrimo taabanaya xuduudaha bari, galbeed ama badda dalka. Haddana, af masiibo lagama dhawree, waana dhacday in si cad loo yidhaahdo: **"Beys milatari baanu bixinay."**

Marka runta la wada hadlo, Somaliland marnaba kuma heshiin in Itoobiya laga iibiyo dhulkeeda ama baddaheeda. Wixii la isku raacay waxay ahaayeen iskaashi, wada-shaqayn iyo wax-wada-lahaansho xaddidan, balse aan marnaba gaadhsiisnayn in dhul ama bad la wareejiyo. Golayaalow, idinka ayaa ummadda u matala sharciga iyo dastuurka, arrintanna Ilaahay hortii ayay idiin iman doontaa. Sidaa darteed, waxaan idinku dhaarinayaa Ilaahay, haddii aad baadhaan arkiifiyada qaranka maanta, kama heli doontaan wax heshiis qoran oo sharci ah; waxa keliya ee jiri kara waa "is-faham" sida kii DP World, balse heshiis rasmi ah oo arkiifiyada yaalla ma jiro—waad baadhikartaan.

Sidee baan anigu u aamini karaa in dal markii hore damacsanaa dhulka Somaliland, maanta si daacad ah loo yidhaahdo: "Somaliland baanu u soo rarnay Itoobiya"? Itoobiya markii horeba Soomaaliya ayay damacsanayd, waxa keliya ee ka maqnaa ayaana ahaa marin badeed. Sidaas darteed, anigu waxaan qabaa in cidda waddadan u jeexday ay ku kacday khiyaamo qaran oo aan laga aamusin karin.

Mudane Guddoomiye, dalkan iyo nin waa kala weyn yihiin. Annaga ummadda ayaa nala soo doortay, Quraankana gacanta ayaannu saarnay inaan ilaalinno midnimada dalka, dhulka, badda iyo sharafta qaranka. Haddana ummaddii kacday, oo tidhi: "Itoobiya ha laga iibin waddanka," markii ay si nabad ah u mudaharaadeen, waxa loo arkay dambiilayaal, ciidamo ayaa loo diray, waxaana lagu yidhi: **"Cadaw qaran baad tihiin."** Taasi waa arrin aad u murugo badan.

Runta haddii la wada hadlo, waddanku maanta badbaado ayuu u baahan yahay. Qof jeebkiisa wax ku qaata ama dano gaar ah wata wuu ka yar yahay Golaha la doortay iyo codka ummadda. Xorriyatul-qawlka iyo hadalka maanta meesha uu marayo dhammaanteen waynu wada aragnaa.

Xaaladda Bab-al-Mandab waad la socotaan; waa marin badeed istaraatiiji ah oo ay dalal badan ku loollamayaan. Sida aan anigu u arko, dab baynu ku ciyaaraynaa. Somaliland baynu ka hadlaynaaye, haddii Itoobiya loo soo raro marin biyoodkaas, waxaynu gelaynaa xaalad go'doon siyaasadeed, amni iyo mid dhaqaale.

Itoobiya weli damaceedu ma istaagin. Shirkii IGAD ee ay hore u diiday, mar labaad ayay dib u codsatay xalay. Dhibaatadu se waa sida ay bad ku heli lahayd, annagana bad annaga ma aha wax lagu gorgortamo ama lagu gado. Dhulku wuu ka weyn yahay wax lagu gado.

Waxa la yidhi: **"Ninka aad ushaada ka qaadan karto ayaa loo dhiibtaa; ninka aanad ushaada ka qaadan karin looma dhiibto."** Hadalkaasna maanta si weyn ayuu inoogu khuseeyaa.

Waar, doorasho iyo wixii aad ka sheekaynaysaan, haddii waddankii laydinku dul xaraashay, xaggee bay doorasho ka imanaysaa? Waddankii baa la iibinayaa, miyaynaan Ilaahay ka cabsanayn?

Doorashadii hore waad wada aragteen; iyadoo Laascaanood ka dhacday, iyadoo gacan-libax lagu galay, iyadoo odayaashii dhaqanku fadhiisteen oo xal keeneen, adinkuna aad ansixiseen wixii ay keeneen, haddana maanta arrintaas lala wareegsanayo. Taasi waxay muujinaysaa in doorasho dhab ah aan loo jeedin.

Waxaan idin gaadhsiinayaa xaqiiqada aan anigu arkayo: marka aynu gaadhno bisha shanaad, marka ay dhammaato 120-kii habeen, waxa la gaadhayaa meel lagu miishanayo arrin cusub oo ah in muddo-kordhin la soo jeediyo.

Waar, muddo-kordhin, doorasho iyo wareegsi way inagu soo badnaayeen. Nin iyo dal way kala weyn yihiin. Dal baa mudan in la badbaadiyo, in la ilaaliyo, in laga reebo dano gaar ah. Dalkaa wayn. Ilaahay baan idinku dhaarshee.

Waxa loo baahan yahay innagoo dad Islaam ah ah in aynu runta u soo noqono, Islaamnimadeenna ilaashanno, dastuurka iyo sharcigana dhowrno, dalkana ilaashanno. **Dal iyo nin way kala weyn yihiin ee aynu kala reebno.**

**Md. Ibraahim Maxamed Jaamac Boodhle** (9 Min, 11 Sec) Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Assalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Waxaan ka codsanayaa Xildhibaanada inay ii dhagaystaan sida aan u dhagaystay. Marka hore, Mudane Guddoomiye, waan ka afeefanayaa; wax jira oo xaqiiqo ah haddii Xildhibaanadu ku celiyaan, taasi waa in shacabkii soo doortay ay dareemaan in Xildhibaanadoodii dareensan yihiin. Hase yeeshee, waan oggolahay in la soo gaabiyo.

Laascaanood wixii ka dhacay, adduunyada kale xilalkaa laga qaadaa; waddankeennase dil ma furna. Laakiin waxa ahayd in Madaxweynaha is-casilo, iyadoo ummad la hor keenay, waji-gabax dhacay, dhimasho timid, xadhig yimid, bahdilaad dhacday. Waxaad arkaysaan sida Puntland inoogu dul dabaal-degayso; intaas ayaan ka leeyahay, ku noqon mayo.

Waxaan ka hadlayaa musuqmaasuqa dhaqaalaha. Hantidii guud waa la wada iibiyay—laga bilaabo garoonkii Timacadde ilaa garoonkii Dhalinyarada Kacaanka ee carruurta lagu hayn jiray (Cawil Burhaan), ilaa goob kasta oo muhiim ah.

Baahida keentay iibintaas lama sheegin. Wasaaradda Maaliyaddu waxba ma sheegin, Madaxweynaha-na ma caddeyn waxa uu ku qabanayo. Sicir-bararkii lama xakamayn. Haddii dhaqaale loo baahnaa, shacabka looma sheegin in cashuurtii laga qaaday ay ku filnaan weyday, dabadeedna ay keentay baahi ah in dhul la iibiyo.

Taasi waa tacaddi. Waxa jira musuqmaasuq baahsan; mashaariicdii looma qaybin gobollada—ha noqdaan ceel-biyood, ha noqdaan waddooyin—khariidado ayaa jira, dhulna waa qarfo oo lama isu gudbo.

Waa caddahay: marka masuul—ha noqdo degmo, gobol ama Madaxweyne—uu rabo inuu wax qabto, wuu qaban karaa. Tusaale: Xildhibaanadii hore ee deegaanka Hargeysa toban sano ayay fadhiyeen; laba sano gudahood ayay muujiyeen inta waddo la xardhay iyo dhismayaasha degmo ee la qabtay, iyada oo aan UNHCR ama beesha caalamka waxba laga keenin—cashuurtii shacabka laga ururiyay, xataa suuqa Waaheen ka gubtay, ayay ku dhiseen.

Ma waxa aad igu odhanaysaan Madaxweynaha oo DP World ka qaadanaya, ama mashaariicda bangiyada GPLT ka qaadanaya, oo cashuurtii oo dhan qaadanaya, ayaa maanta shaqo qaran oo keliya dalka ka qabtay? Ii sheeg waxa kale ee raacay. Shaqo qaran ma aha in wiilal yar yar oo ciidan ah, oo si fiican aan loo tababbarin, la geeyo—waxii ku dhacay dagaalkii waad ogtihiin. Ciidan sida loo tababbaro waynu naqaan.

Ma waxa aynu ka waynay in Madaxweynaha cisbitaalka weyn ee Hargeysa, 1954-kii la dhisay (Hargeysa Group), wax ka qabto? Weli waa siduu ahaa. Haddii caawa xanuun dhaco, Jabuuti ama Itoobiya baa loola cararaa. Miyaanu garan karin inuu $10 milyan geliyo?

Dhulkii hantida ahaa ee la iibiyay—saldhigii booliiska ee Laynta Booliiska u dhawaa—waa markii labaad ee la iibiyo. Anigu diidmo kuma lihi iibinta, laakiin caqli ma la waayay yidhaahda: "Badhkan baahi baa keentay, ciidamadiise xaggee la gaynayaa?" Ma in la yidhaahdo taliyaha ciidanka ha u diro? Mise "reer walba ka bax" baa la yidhaahdaa? Mise intimidation ayaa lagu sameeyaa dadka iyo odayaasha?

Hala iibiyo, balse maxaa u diiday in qayb ka mid ah kor loo dhiso—adduunka kor baa wax loo dhisaa—inta soo hadhayna laga dhiso 200 guri oo ay ku jiraan ciidanku?

Waxaan kaloo ka hadlayaa xuquuqda shacabka ee uu Dastuurku qirayo—Qodobka 25aad—oo dhigaya in muwaadin marka la qabto ay booliisku 48 saacadood gudahood maxkamad iyo xeer-ilaalin ku geeyaan; haddii Remand loo dirayo, meesheeda.

Maanta intimidation iyo talis-yaqaanimo ayaa jirta; ciidammo ayaa rag shaqadoodii lagala soo baxayaa, iyadoo kaamirooyin duubayaan, lagu tunayaa, dabadeed meel la dhigayaa. Ma taas baynu qaadan karnaa annagoo shacabka matalayna? Taasi waa ku tumasho xuquuqda shacabka.

Annaguna maanta waan ka werwersanahay codkii naloo doortay ee Dastuurku ina siiyay. Marka shacabkii la garaaco, ma ku noqonaynaa tacaddii aynu ka cararnay 1984—Ina Kaahin iyo Muuse Biixi ka carareen? Taasi ma aha mid la qaadan karo. Annaga ayaa shacabka matalna; xuquuqdeenna ayaa la duudsiyay.

Haddii taasi socoto, Goojacadde sahal bay noqonaysaa. Anigu waan ogahay Madaxweynaha inuusan shacabkiisa ku hayn karin haddii ay kacaan. Hore ayaan u soo taagnaa 1982; maanta waxaan dareemayaa sidii 1982 markii nabad-sugiddu iga daba iman jirtay. Maanta imagareeshan baa jirta—anigoo 60-jir ah ayaan haddana dareemayaa wixii aan arday yar ahaan dareemi jiray; anigoo soo maray tacaddi, xadhig, dhac, kufsi, iyo diyaaraddayda oo laygu garaacay.

Goojacadde iyo Laascaanood marka la yidhaahdo "cadaw baa inagu soo duulay", ma aha cadaw; waa sidii Siyaad Barre oo kale oo shacabkeennii Sool lagula dagaallamay. Maxaynu been isu sheegaynaa, Guddoomiye? Markhaati ayaad iiga tahay; Sool waad iga xog-ogaal badan tahay. 33-kii madax-dhaqameed ee beeshaasi lahayd maanta midna iskama wada raacin. Waqtigii Siyaad Barre ma dhicin in Isaaq sidaa isu wada raaco. Maxaa soddonkaas madax-dhaqameed isku keenay—ma wax dhacay maaha? Ma been baynu isu sheegaynaa?

Waxaan aaminsanahay inta hadhayna. Waxaad maqashaan kubbad haaf-garoon lagu ciyaarayo. "Muusow, Hargeysa iyo Sheekh baa kuu soo hadhay" baa la yidhi; intii kale ma afartan qori iyo tiknikooyin iyo qabaa'illo ayaad nagu horjoogsanaysaan? Intee se nagu hayn kartaan?

Boorama way soo kuddhuddhaysaa; shalay baa la dajiyay. Ma ku soconaysaan idho-adayg? Dal gubanaya waxaa guba nin madax-adag, dastuurka diida, yeeli waaya wixii dalka loogu ballamay. Somaliland axdi bay ku dhisantay—axdi qaran. Sool iyo Harti way ku daysay; kuwo kalena way diidan yihiin. Madaxweynaha iyo shacabkuna waa kuwaa hadlaya maalin walba. Haddii aad tiraahdaan "qori baan idinku haynaa", horay baan u soo aragnay 1983 wixii ka dambeeyay.

Tan kale: xeerkii xalinta Somaliland ee beel keentay oo la wada qaatay—xeerkii lagu heshiiyay sidii "waysada Nabiga"—xeerkaa nabadda ahaa ee markii hore Guurtidu inoo keentay, maanta mar labaad in daaqad aan xeerar ahayn laga soo geliyo waa tacaddi xeerka ah; waa tacaddi shacabka; waa tacaddi nabadda.

Guddoomiye, adaa nagu hoggaaminaya xeerkii aad ogayd ee markii hore biyaha lagu riday ee laysla gaadhay, maanta Somaliland oo dhan baa wada eegaysa. Kiina Madaxweynaha si qayru-sharci ah ayuu uga maray; Guurtiduna si qayru-sharci ah ayay uga martay. Haddii meel-ka-dhac la eego, cidda baabi'isay wada-shaqayntii labada Gole waa Guurtida. Shalay ayay xeerkii aan baas-garaynay noogu soo rideen iyagoo ka boodday saddexdii tallaabo ee Dastuurku u furay wada-shaqaynta: in ay sidiisii noogu soo gudbiyaan, in ay wax ka beddelaan, ama in ay diidaan.

Maalintaas ayaa Somaliland sharcigeedii cagta hoosteeda la geliyay. Somaliland se dulqaad iyo isu-samirsanaan bay ku socotaa. Laakiin waxaan idiin sheegayaa: ummadda dulqaadkii wuu ka dhammaaday. Dareenka aad iga arkaysaan—anigoo Xildhibaan Hargeysa laga doortay—waa dareenka aan ka qabo dalkayga. Shalay Muuse baan raacay; beeshiisa baan raacay; u codeeyay—adigana kuu codeeyay. Nasiib-darro, halkaa ayaa la gaadhay iyadoo cidna xeerinayn.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| -------------------------------------------------- | -------------------------------------- |